

Warbixinta Loogu Tallagalay Badbaadadaada (Information For Your Stay)

Goobta Is-gooniyaynta ee lagugu caawinayo (Assisted Self-Isolation Site)

Maamulada caafimaadka bulshada ee wadanka oo dhan waxay ku dadaalayaan inay yareeyaan faafida COVID-19. Qof walba ee qaba COVID-19 iyo kuwa ka ag dhow waxaa looga baahanyahay inay isgooni-yeelaan guriga ama aaga loogu talloagalay inta lagu jiro muddadooda isgooniyeynta (fiiri Lifaafa A: 'Waxbarashada oo muddooyinka karantiilka qasabka ah').

Waad ku mahadsantahay rabitaankaaga ah inaad joogto hoteelkaan gooniyeynta si aad uga caawiso badbaadinta xubnaha qoyskaaga iyo bulshada inteeda kale.

Warbixinta Guud ee COVID-19 (General COVID-19 Information)

Fadlan booqo websaydkeena ahs.ca/covid si aad u hesho tallooyinka iyo warbixinta la cusbooneysiyo.

Waa maxay astaamaha COVID-19? (What are the symptoms of COVID-19?)

- Dadka la xanuunsan caabuqa COVID-19 waxay sheegeen xanuun neefsasho oo yar ama aad u daran oo sita astaamo qufac, qandho, xinraag, dhuun xanuun, diif, neefsashada oo adkaato iyo/ama yaraanshaha neefsashada.
- Iyada oo COVID-19 sababi karo jiro daran, dad badan waxay yeesheen astaamo saxlan kaliya ah.
- Caabuqa COVID-19 aad ayuu halis ugu noqon karaa waayeelada iyo dadka qaba xaaladaha caafimaadka sida sonkorta, arimaha wadnaha, ama dhibaatooyinka neefsashada.

Sidee ayuu COVID-19 ugu faafaa qof-ku-qof? (How is COVID-19 spread from person-to-person?)

- COVID-19 wuxuu inta badan ku faafaa qufaca, hindhista ama taabashada tooska ah ee qofka jiran, ama taabashada sagxadaha qofka xanuunsan dhawaan taabtay.
- COVID-19 wuxuu sidoo kale ku faafi karaa halka dhibcaha (sida ka bilow qufaca ama hindhista) ku dagto sagxadaha oo kadib qof taabto. Haddii qofkaas saaro gacmahooda meel u dhow afkooda, sanko ama indhaha, qofka wuu jiran karaa.
- Kuwa la nool dadka qaba COVID-19 waxay halis badan ugu jiraan inay qaadaan, gaar ahaan marka guriga uu dad badanyahay. Joogitaankaaga hoteelka gooniyeynta, waxaad gacan ka geysanaysaa badbaadinta qoyskaaga iyo bulshada ballaaran.

Ku saabsan Joogitaankaaga Hoteelka Is-gooniyeynta ee Lagugu caawinayo (About Your Stay at the Assisted Self-Isolation Hotel)

Waxaad halkaan u joogtaa mid ka mid ah dhawr sababood:

- Waxaa lagaa helay COVID-19

Goobta Is-gooniyaynta ee lagugu caawinayo (Assisted Self-Isolation Site)

- Waxaad leedahay astaamo u eg kan caabuqa COVID-19
- Qof joogo gurigaaga ayaa qabaa COVID-19 oo waxaan rabnaa inaan kaa fogayno si aan badbaado idinkugu hayno.

Waxaad halkaan u joogtaa iqtiyaari si aan kaaga caawino ka fogaanta xubnaha qoyska. Ma jiro qof kugu qasbayo inaad ku nagaatid goobtan haddii aad jeclaato inaad guriga ku laabatid.

Haddii aad qabtid COVID-19 ama astaamo u eg, waxaad joogeysaa halkaan illaa astaamahaaga ka dhammaadaan oo laga joogo ugu yaraan 10 maalmood tan iyo goortay astaamahaaga bilowdeen (hadba midka dheer).

Haddii aad u joogtay goobta si aad isaga illaalisid nafsadaada xubnaha guriga ee qaba COVID-19, waxaad joogeysaa jooftan illaa gurigaaga lagu hubsado badbaado.

Inta lagu jiro waqtigaaga halkaan, waa inaad joogtaa qolkaaga lagu qoondeeyay si loo dhawro caafimaadka naftaada iyo martida kale. Waa inaad xadeysaa kulanada fool-ka-foolka ee dadka kale. Waxaad heleysaa kormeerida caafimaadka socdo iyo taageerada kale si taleefon ahaan ah.

Waan fahamsannahay inay aad ay caqabad u tahay in lagaa gooni-yeelo saaxibadaada iyo qoyskaaga. Waxaan Sameyneynaa dadaalkeena si aan kaaga yeelno inaad meesha raaxo ku joogtid.

Qarsoodi (Confidentiality)

Wixii arimahaaga gaarka ah iyo ixtiraamida dadka kale ee halkaan dagan, waxaan ku weydiisaneynaa inaad joogteysaan qarsoodiga rasmi ah ee magaca iyo goobta gaarka ah ee aagaan gooniyeynta.

Baaritaanka COVID-19 (COVID-19 Testing)

Haddii aad buuxisid sharuuda baaritaanka COVID-19, waxaan kuu diyaarineynaa in lagu baaro haddii aanan weli lagu baarin.

Tallaabooyinka Caafimaadka iyo Difaaca Shaqsiyadeed (Medical and Personal Protection Measures)

Waxaa lagu siin doonaa maaskarooyin iyo gacmo-gashi intaadan ka soo tagin gurigaaga, oo waxaa lagu siinayaa kayd yar oo joogitaankaaga aaga karantiilka ah. Intaan halkaan joogtid, looma baahno inaad ku xiratid maaskaro qolkaaga, laakin waxaa lagaaga

Goobta Is-gooniyaynta ee lagugu caawinayo (Assisted Self-Isolation Site)

baahanyahay inay kuugu xirnaato maaskaro iyo gacmo-gashi haddii aad sabab kasta uga baxdo qolka oo ogeysii soo-dhaweynta.

Shaqaalaha caafimaadka waxay joogteynayaan kula xiriiridaada taleefonka si loo kormeero caafimaadkaaga loona sameeyo qiimeynada dheeraad ee caafimaad sida loogu baahnaado haddii aastamahaaga kasii daraan.

Wixii baahiyada qoraalada dhaqtarka daawada, fadlan la xiriir dhaqtarka qoyskaaga. Wixii su'aalaha caafimaadka ee aan dagdagga aheyn ama haddii ay ka daraan calaamadahaaga, fadlan la soo xiriir 811 ama xafiiska dhaqtarkaaga qoyska. Wixii baahiyada caafimaadka ee dagdagga ah, wac 911 oo ogeysii inaad joogtid goobta karantiilka COVID-19.

Dhaqaaqyada/Martida (Movement/Visitors)

Waxaa lagaa rabaa inaad joogtid qolkaaga muddada buuxdo ee gooniyeynta. Waxaa jiro xeer adag ee ah in aan martida la ogolayn inta lagu jiro joogitaankaaga si looga hortago faafida suurtoogalka ah ee fayraska.

Cuntooyinka (Meals)

Maalin walba, waxaa lagu siinayaa quraac, qado, casho, iyo cabitaano.

Fadlan ka fogow isticmaalida adeegyada keenida cuntada banaanka ama wacitaanka adeega qolka ee hoteelka, saa shaqaalaha la ansixiyay kaliya ayaa soo gali karo meesha karantiilka.

Wakiilada hoteelka ayaa maalin walba kula soo xiriirayo si ay u diyaariyaan cuntooyinka oo albaabkaaga kuugu keenaan. Fadlan ogeysii iyaga xasasiyadaada cunto ama cuntooyinka aadan cuni karin.

Biyaha Tuubada (Tap Water)

Biyaha tuubada ee hoteelada waa nadiif oo waa la cabi karaa.

Adeegyada Qolka (Room Services)

Illaalada guriga waxay uga tagayaan go'yo cusub, agabka musqulaha, iyo saadadka nadiifinta banaanka albaabka inta lagu jiro muddada karantiilka. Waa inaad uga tagtaa qashin kasta, shukumaanada iyo maryaha gudaha bacaha lagu siiyay oo banaanka albaabkaaga uga tag (markale, adoo xiran maasgaro marka aad fureysid albaabkaaga).

Tallaabooyinka Daryeelka Shaqsiyadeed (Personal Care Measures)

Goobta Is-gooniyaynta ee lagugu caawinayo (Assisted Self-Isolation Site)

Si loo hubiyo joogitaankaaga halkaan inay ahaataa nasiino buuxdo ee suurtoogalka ah, tixgeli kuwa xiggo:

- Joogtey firfircoonida adiga oo iskala bixinayo, dhaqaaqyada tartiibka ah, iwm.
- Ku dhaqan feejignaan, deganaansho, neefasho qoto-dheer, iyo waqti ku qaadashada taganaanshaha.
- Ku xirnow qoyska iyo saaxibada (tusaale ahaan, taleefonka, FaceTime, WhatsApp, Skype) Hubi inaad si joogta ah u cuntid, cab biyo badan, oo hel hurdo kugu fillan.
- Waqti ku qaado inaad sameysid waxyaabaha kugu caawiyo inaad wanaag dareentid sida dhageysiga muusiga ama aqrinta buugga.
- Shaqaalaha ogaysii haddii ay jiraan wax kale oo wanaajin karo joogitaankaaga.

Keenista Hoteelka ama Qolkaaga (Deliveries to Hotel or your Room)

Haddii aad leedahay baahiyo gaar ah oo daruuri ah, fadlan nasoo ogeysii oo waan ku dadaalaynaa si aan kaaga qaabilno. Waxaan si gaar kuu weydiisaneynaa inaad ka fogaatid dalbashada badeecooyinka onleenka iyo inaad qaadan baakadaha daryeelka laga keenay bannaanka.

Intarneetka iyo wacitaanada taleefonka (Internet and phone calls)

Jaheynada aad ku helayso wifi bilaash ah ee aagga laguu qoondeeyay waa lagu siinayaa. Fadlan isticmaal taleefonkaaga ama tableetka gaarka ah markaad samaynaysid wacitaanka banaanka iyo wacitaanada fiidiyaha.

Xiriirada Shaqaalaha gooniyeynta (Communications with Isolation Staff)

Fadlan u dir su'aalo ama walaacyo walba shaqaalaha hoteelka. Shaqaalaha hoteelka waxaa kuu suurtoogalinayaa la xiriirka hay'ada bulshada haddii aad u baahanto taageerada dhaqanka, bulshada, iyo luuqad.

Caawinta Degdega ah (Urgent Assistance)

Wixii xaalada degdega ama nolosha halista ku ah, soo wac 911.

Goobta Is-gooniyaynta ee lagugu caawinayo (Assisted Self-Isolation Site)

Lifaaqa A: Waxbarashada muddooyinka gooniyeynta qasabka ah (Appendix A: Education on mandatory isolation periods)

Reer Albertaha leh aastaamaha

- Waxaa sharci ahaan lagaaga baahanyahay inaad is gooni yeesho ugu yaraan 10 maalmood haddii aad qabtid qufac, qandho, yaraanshaha neefsashada, diif, ama dhuun xanuunka oo aan la xiriirin jirooyinka horay u jiray ama xaalada caafimaad.
- Muddada gooni-yeelka qasabka ah waa 10 maalmood laga bilaabo bilowga aastaamaha, ama illaa aastaamaha dhammaadaan, midka hadna soo hormaraa.

Laga helay COVID-19

- Waxaa sharci ahaan lagaaga baahanyahay inaad is gooni-yeesho ugu yaraan 10 maalmood haddii lagaa helo COVID-19.
- Muddada isgooni-yeelka waa 10 maalmood ka bilaabato bilowga aastaamaha, ama illaa aastaamaha dhammaadaan, hadba midka soo hormara.

Taabashada dhow ee qofka lagu xaqiijiyay

Sharuuda taabashada dhow: (a) waxay bixisaa daryeelka jir ahaanta iyada oo aan jirin isticmaal ku haboon ee qalabka difaaca shaqsiyadeed (PPE); (b) la nool ama la yeeshay taabashada jir ahaaneed oo dheer (u jirsi 2 miitir in ka badan 15 daqiiqo) iyada oo aan jirin isticmaalka PPE ku haboon, (c) si toos ah ugu hindhisay ama ku qufacay.

- Waxaa sharci ahaan lagaaga baahanyahay inaad isgooni-yeesho 14 maalmood oo aad kormeertid aastaamaha haddii aad taabasho dhow la sameysay qof laga helay COVID-19.
- Haddii aad la xanuunsantid qufac, qandho, yaraanshaha neefsashada, diif, ama dhuun xanuunka inta lagu jiro waqtigaan, waa inaad isgooni-yeeshaa 10 maalmood oo ka bilaabato bilowga aastaamaha ama illaa aastaamahaaga dhammaadaan, hadba midka soo hormara.

Warbixinta Gooniyaynta

- Isgooni-yeelka waxaa laga wadaa inaad joogtid guriga ama goob gooniyayn illaa aad ka ogaatid natiijooyinkaaga baaritaanka COVID-19 oo aad dhameystiratid muddada gooniyaynta.

Wada noolaanshaha

- Haddii loo baahdo, dadaalada waa in lagu sameeyaa si la iskugu geeyo dadka COVID-19 qaba ee sheybaarka xaqiijiyay.
- Taabashooyinka dhow aastameysan ee kuwa qaba COVID-19 waa in la baaraa oo loo yeelaa qolkooga gaarka ah inta ay sugayaan natiijooyinka baaritaanka. Waa inaysan la wadaagin meel dadka qaba COVID-19 ee la xaqiijiyay ama dadka leh aastaamaha.

Wixii Warbixin faahfaahsan ee Dheeraad ah oo ku saabsan isgooniyaynta:

<https://www.alberta.ca/isolation.aspx>